

# Isbeddelada taakulynta nolosha ku soo socda



## Miyaad ku talo jirtaa inaad taakuleynta nolosha codsato? Codso marka hore taakuleymada kale

**Taakuleynta nolosha isbeddel ayaa ku imanaya bisha Febraayo ee 2026. Wakhtigaas kaddib waxaa macquul ah inaad hesho taakuleynta nolosha oo intii hore ka yar haddii aad codsan waydo shaqo ama taakuleymada kale ee Kela-du bixiso.**

Taakuleynta noloshu waa taakuleynta ugu dambeysa ee qofku xaq u leeyahay. Taas macnaheedu waxa weeyaan inaad marka hore xareysato taakuleymaha kale ee macquul ah inaad xaq u leedahay oo dhan. Taakuleymahaasi waxaay noqon karaan tusaale ahaan kuwa shaqo la'aanta, kuwa kirada ama ijaarka lagu kabo, kuwa ardeynimada, kuwa xanuunka qofka lagu siiyo ee maalinlaha ah, lacagta maalinlaha ah ee waalidnimada ama kuwa howlgabka.

Taakuleynta noloshu waxaay isbeddeleysaa 1.2.2026. Markaas kaddib waxaa suurta gal ah inay Kela-du taakuleyntaada qaybteeda aasaaska ah yarayso boqolkiiba konton (50 %), markay jiraan xaaladahan hoos ku qoran:

- Adeegyada shaqaaleysiinta iskagamaad diwaangalinin inaad tahay shaqo codsade shaqo buuxda raadinaya.
- Maad codsanin taakuleymaha kale, ee macquul ah inaad xaq u leedahay.

## Soo ogoow taakuleymaha kale ee suurta galka ah

Soo ogoow taakuleymaha kale ee xaaladdaada marka la qiimeeyo mudnaanta koowaad u leh inaad hesho. Waxaad macluumaadkaas ka akhrisan kartaa cinwaanka **www.kela.fi/ensisijaiset-tuet** (ku qoran luqad faseex ah).

**Codso taakuleymaha kale intaanan la gaadhin bisha Febraayo ee 2026, si taakuleyntaada noloshu aanay u yaraanin.**

**Haddii aad codsatayba taakuleymaha kale, Kela-du kaama yaraynayso qaybta aasaaska ah ee taakuleyntaada nolosha.**

Kela

# Haddii aan hoos u dhigno qaybtaada aasaaska ah, waxaad helaysaa taakuleyn ka yar intii hore

Qaybta aasaaska ah waa qayb ka mid ah taakuleyntaada nolosha.
Waxaa lagu xisaabiyay kharashaadka caadiga ah ee nolosha maalinlaha ah, sida raashinka iyo dharka.
Sannadka 2025 qaybta aasaasku waa 593,55 yuuro bishii, haddii aad kaligaa nooshahay.
Kela-du qaybtaada aasaaska oo sideeda ah kuuma soo shubayso.

Kela-du waxaay yareyneysaa oo kaliya qaybta aasaaska ee uu leeyahay qofka aanan codsanin shaqo buuxda ama taakuleymo kale.
Kela-du ma yareyneyso qaybta aasaaska ee ay leeyihiin dadka da'doodu 18 sano ka yartahay.

Tusaalaha hoos ku yaalla ayaad ka arki kartaa sida isbeddelka sharcigu uu u saameynayo cadadka taakuleynta nolosha.
Qoraalka kooban ee y/b macnahiisu waa yuuro bishii.

## Tusaale: Sidan ayaay qaybta aasaaska oo la yareeyay u saameyneysaa Janne taakuleyntiisa

- Janne waa shaqo la'aan. Isagu ma laha dakhli soo gala.
- Janne kaligii ayuu Helsinki ku noolyahay. Janne kiradiisu waa 700 y/b.

| Xaaladda Janne | Cawaaqiibta | Janne waxaa loo shubayaa |
|---|---|---|
| Janne wuxuu codsaday taakuleynta nolosha oo kaliya. | Kela- da ayaa ku boorisay inuu taakuleymaha kale codsado muddo hal bil ah gudaheeda. | Taakuleynta nolosha muddo 1 bil ah 1 300 y/b |
| Janne ma codsanayo taakuleymo kale, inkastoo Kela- du ay ku boorisay. | Qaybta aasaaska ah ee taakuleynta nolosha (600 y/b) waxaa la yareynayaa boqolkiiba konton ka mid ah (50%) | Taakuleynta nolosha waxaa la siinayaa 1 000 y/b taas oo ah **300 y/b in ka yar bishii hore!** ! |
| Janne wuxuu sidoo kale codsanayaa taakuleymada kale ee uu xaq u leeyahay oo ay ku jiraan taakuleynta shaqo la'aanta iyo taakuleynta kirada ama ijaarka. | Qaybta aasaaska ah lagama yareynayo. | Wuxuu helayaa taakuleymo isku gayntoodu tahay 1 300 y/b |


## Sidan ayaa loo xisaabinayaa cadadka taakuleynta nolosha

Kela-du waxaay isku xisaabinaysaa dakhligaaga, hantidaada iyo taakuleymahaaga kale oo dhan waxaayna kuwaas ka jaraysaa kharashkaaga daruuriga ah. Qaybta aasaaska ah waxaa lagu xisaabinayaa kharashkaaga.

Haddii kharashkaagu uu ka badanyahay dakhligaaga, waxaay Kela-du kuu oggolaan kartaa taakuleynta nolosha.

## Taakuleynta nolosha ayaad heli kartaa, haddii kharashkaagu uu ka badanyahay dakhligaaga

! Dakhligaaga, hantidaada iyo taakuleymahaaga kale – kharashkaaga la aqbali karo (sida kirada iyo qaybta aasaaska ah) = cadadka taakuleynta nolosha




Kela